VALG

Ku socota dadka leh xuquuqda codaynta doorashada baarlamaanka ee sannadka 2025

## Isticmaal xuquuqdaada codbixineed!

8. sibtember Norway waxa loo dareerayaa doorashada baarlamaanka. Codbixintaadu waxa ay taageero u tahay habka dimuquraadiyadda ee Norway. Waraqddan sababta laguugu soo dirayaa waa, in aad mar ka mid ah sideedii sannadood ee u danbeeyay aad heshay xuquuqda codaynta doorashada baarlamaanka.

### Ka qayb qaado kor u qaadista tirada dadka codkooda dhiibta

Dimuquraadiyaddu waxa ay u baahantahay in codbixiyeyaal badani ay codkooda dhiibtaan. Haddii ay tahay markii kuugu horaysay ee aad doorashada Norway codaysid iyo haddii aad hore u soo cadaysayba, waxa aanu rajaynaynaa in aad ka qayb qaadatid qaabaynta sayaasadda lagu hagayo waddanka. Xisbiyadda siyaasadda iyo shaqsiyaadka aad codkaaga siinaysid, waa wax adiga kuu gaar ah. Waxa ugu muhiimsani waa in aad codkaaga dhiibatid.

### Macluumaad guud oo ku saabsan doorashada.

Maalinta doorashada loo asteeyay waa 8.sibtember 2025. Degmooyinka qaar, maalinta axadda 7 sibtember-na waa la codayn karaa. sidoo kalena goob kasta oo aad waddanka ka joogtid, codkaaga hore ayaad u sii dhiiban kartaa inta ka horaysa 5 sibtember.

Waxbixin ku saabsan goobaha codbixinta iyo goobta aad ka codayn kartid waxa aad ka helaysaa bogga valglokaler.no.

Marka aad codaynaysid, ha ilaawin in aad wadatid/sidatid aqoonsi laga dheehan karo magaca, taariikhda dhalashada iyo sawir.

Haddii aad qabtid su`aal la xidhiidha dhinaca farsamada, waxa aad la xidhiidhi karta degmadaada ama warbixin dheeraad ah ka akhriso bogga valg.no. Boggan waxa kale oo aad ka helaysaa waxbixin ku saabsan goobta codbixinta iyo qaabka aad u codayn kartid.

Isticmaal xuquuqdaada codbixideed. Doorasho wanaagsan!

Salaan
Waaxda doorashooyinka

**Waaxda doorashooyinka**

Waaxda doorashooyinku waxa ay hoos tagtaa wasaaradda degmooyinka iyo gobolada, waxaana loogu talagalay hirgelinta qaab dimuquraadiyadeed oo si fiican u shaqaynaya si aanay dadka Norway ku nool uga lumin kalsoonida lagu qabo qaabka codbixinta. Hadafka guud ee sannadka 2025-ka ee waaxdu waa, in ay ka qayb qaadato sidii ay doorashada baarlamaanka iyo golaha Samer-ku (sametingsvalget) ay ugu dhici lahayd qaab sax ah, la hubsaday, daah furan oo lagu kalsoonaan karo.

VALGdirektoratet

Telefon: 33 41 29 40 | E-post: post@valg.no
Postboks 2080, 3103 Tønsberg
www.valg.no